


## Timaamidda bukaan-socodka ee dhiigga ku jira saxarada (unugyada dhiiga guduudan ee saxarada) Baaritaan ururin lagu samaynayo tijaabada F.O.B


1

In yar oo saxaro ah toos ugu qabo warqadda musqusha, ama in yar oo warqadda musqusha ah dhig suuliga si aad saxarada ugu dul ururiso.




2

Ka fur Furka **BULUUGGA** ah tuubada shaybaarka oo ka soo saar usha yar ee shaybaarka. Qaybta cad, waxay ahaanaysaa lama taabtaan (keliya waxa loogu talagalay shaqaalaha shaybaarka).





3

Dhex gelgeli Qaybta **BULUUGA** ah ee usha shaybaarka dhowr meelood oo kala duwan oo ka mid ah saxarada.




4

Saxarada dheeraadka ah ka qallaji usha shaybaarka adigoo si tartiib ah ugu masaxaya warqadda musqusha. Jeexjeexyada keliya ayay tahay inay saxaradu ka buuxdo.



5

Usha shaybaarka ku celi tuubada oo si fiican u xir.



- Waxa muhiim ah in aanay qaadista shaybaarku dhicin xilliga caadada dumarka, marka ay jirto babaasiir dhiigaysa ama ay saxaradu dhiig leedahay. Marka dhiig la arkayaa ku yaal saxarada, shaybaarka toos ha uga qaadin dhiiggaa. Dhakhtarkaagana u sheeg.
- Tuubada ku calaamadi magacaaga, lambarkaaga shakhsiga ah iyo taariikhda qaadista shaybaarka.
- Shaybaarkan waxa lagu hayn karaa heerkulka caadiga ah ee gudaha (qaboojiyaha ayaa la gelinayaa haddii wakhti dheer la kaydinayo). Shaybaarkan waxa loo gudbinayaa meesha lagu shaybaarayo 7 maalmood gudahood oo ka bilaabma markii la qaaday shaybaarka. Haddii aan tijaabooyinka oo dhan lagu qaadi karin 7 maalmood gudahood, markaa shaybaar kasta keligii ayaa la gudbinayaa.
- Saddex tijaabo oo isku xiga, lana qaaday maalmo kala duwan, ayaa loo baahanyahay si loo helo natiijo baaritaan oo hubaal ah.